



Nagu Caawi in aan si Wanaagsan u Baranno Bukaannadeenna

Marka aan naqaanno jinsiyaddaada iyo haybtaada, waxaan wax badan ka baranaynaa dhaqankaaga iyo luqaddaada. Tani waxay naga caawineysaa in aan si fiican kuu baranno aanna kor u qaadno daryeelka aan bukaannada oo dhan siinno. Laga billaabo Bisha Koowaad ama Jannaayo 2007, waxaan bukaannada oo dhan ka codsan doonnaa war ku saabsan jinsiyadda iyo haybta.

Waa maxay Haybtaadu?

Haybtaadu waxay ku saabsan tahay meesha aad ka soo jeedo, caadada, dhaqanka, awooweyaashaadii hore ama mararka qaarkood waddankii aad ku dhalatay. Fadlan nala socodsii haddii aad tahay Haytiyaan, Fiyetnaamees, Baraasiiliyaan, iwm etc.



Miyaad tahay Hispanic, Latino ama

Waxaa laga yaabaa in aad tahay Hispanic, Latino ama Isbaanish haddii aad adiga ama qoyskaagu aad ka timaaddeen waddan ku yaalla Latin Ameerika ama waddanka luqadda Isbaanishka looga hadlo. Fadlan nala socodsii haddii aad isu hayatid inaad tahay Hispanic, Latino ama Isbaanish.

Waa maxay Jinsiyaddaadu?

Jinsiyaddaadu waa koox ama kooxo aad ku qeexeyso in aad wadaagtaan astaamo jidh ahaaneed ama asal juqraafiyadeed ama bulsheed. Fadlan nala socodsii haddii aad tahay Aasiyaan, Madow, Caddaan, iwm.

Tusaalooyin:

Magacaygu waa John. Jinsiyaddayduna waa Aasiyaan haybtayduna waa Bangaladeshi.

Magacaygu waa Claudia. Jinsiyaddayduna waa Madow haybtayduna waa Haytiyaan iyo Jamaykaan.

Magacaygu waa Ronaldo. Jinsiyaddayduna waa Caddaan iyo Madow haybtayduna waa Baraasiiliyaan.

Magacaygu waa Pat. Jinsiyaddayduna waa Madow haybtayduna waa Ameerikaan Afrikan ah.

Magacaygu waa Chris. Jinsiyaddayduna waa Caddaan haybtayduna waa Talyaani iyo Ameerikaan.



Markaan si wanaagsan kuu baranno, waxaan daryeel wanaagsan u qaban karaynaa bukaannadeenna

Hadafkeennu waa in aan la kulanno baahida bukaannada aan u adeegno oo dhan. Daraasado ayaa muujinaya in ay kala duwanana ka jirto caafimaadka kooxaha jinsiyadda iyo haybta kala duwan. Ma garanayno waxa sababay kala duwanaantaan waxaanna dooneynaa in aan wax badan ka ogaanno. Waxaan si wanaagsan ula kulmi karnaa baahida bulshooyinka aan u adeegno haddii aan wax badan ka naqaanno bukaannada jinsiyaddooda, haybtooda, dhaqankooda iyo luqaddooda. Warkaan waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya si loo xaqiijiyo in bukaannada oo dhan ay u helaan daryeelka ku habboon ee ugu tayada wanaagsan.



Waxaan kor u qaadaynaa
caafimaadka dadka oo **DHAN**

Insert hospital
logo here